

# Sida Burcadda Interneetka la Iskaga ilaaliyo



## Afar Calaamadood oo muujinaya Burcadnimada

Somali

1

### Burcaddu waxay ISKA DHIGAAN in ay ka socdaan urur aad taqaano.



Burcaddu waxay inta badan iska dhigaan in ay kuula soo xiriirayaan in ay ka socdaan dowladda. Waxaa laga yaabaa in ay isticmaalaan magac jira, sida Social Security Administration (Maamulka Ammaanka Bulshada), IRS, ama Medicare, ama in ay soo samaystaan magac u muuqda mid rasmi ah. Qaarkood waxay iska dhigaan inay ka socdaan ganaci aad taqaano, sida shirkad adeeg bixisa,, a shirkad teknoolojiyad, ama xataa sadaqo ayaga oo deeq ku weydiinaya.

Waxay isticmaalaan teknoolojiyad si ay u badelaan lambarka teleefoonka kaaga muuqanaya shaashaddaada aqoonsiga qofka kusoo wacaya. Sidaa darteed lambarka iyo magaca aad aragto waxaa dhici karta in aysan dhab ahayn.

2

### Burcaddu waxay yiraahdaan waxaa jirta DHIBAATO ama ABAALMARIN.



Waxaa dhici karta in ay ku yiraahdaan dawladda ayaa khatar kugu haysa. Ama waxaad ku leedahay lacag. Ama qof qoyskaaga kamid ah ayaa xaalad degdeg ah kujira. Ama in fayras kujiru kumbuyutarkaaga.

Qaar kamid ah burcaddu waxay yiraahdaan in dhibaato kajirto mid kamid ah akoonadaada aadna u baahan tahay in aad xaqijiso qaar kamid ah macluumaadkaaga.

Qaarkood been ayay sheegayaan waxayna ku dhahayaan waxaad ku guulaysatay lacag bakhtiyaa nasiib ah ama khamaar laakiin si aad lacagtaas u hesho waa in aad lacag bixisaa.

3

### Burcaddu waxay kugu CADAADINYAAN inaad si dhakhso ah howsha u qabato.



Burcaddu waxay kaa rabaan in aad howsha qabato kahor inta aadan helin wakhti aad ku fakarto. Haddii aad teleefoonka ku wadahadlaysaan, waxaa dhici karta in ay kuu sheegaan in aadan jarin si aadan u hubin sheekadooda.

Waxaa dhici karta in ay kuugu hanjabaan in ay ku xirayaan, maxkamad ku gaynayaan, kaa qaadanayaan shatiga darawalnimada ama ganacsigaaga, ama ku tarxiilayaan. Waxaa dhici karta in ay kuu sheegaan in kumbuyutarkaagu halaabayno.

4

### Burcaddu waxay kuu sheegayaan in aad lacagta u BIXISO qaab gaar ah.



Waxay inta badan ku adkaystaan in aad lacagta ku bixiso adiga oo adeegsanaya lacagaha kiribtoga(cryptocurrency), adiga oo adeegsanaya acoon lambar shirkad sida MoneyGram ama Western Union, ama adiga oo lacagta ku shubaya kaarka wax lagu iibsado kaddibna in aad siiso lambarka kaarka gadaashiisa ku qoran.

Qaarkood waxay kuusoo diri doonaan jeeg (kaasoo hadhow noqonaya mid aan waxba kajirin), ayaga oo kuu sheegaya in aad ku shubato, kaddibna aad lacagta usoo dirto.

# Sida Burcadda Interneetka la Iskaga ilaaliyo

## ► Iska xir wicitaanada aadan doonayn iyo fariimaha qoraalka ah.

Qaad tallaaboojin aad iskaga xirayso wicitaanada aadan doonayn aadna iskaga baarayso fariimaha qoraalka ah ee aadan doonayn.

## ► Ha bixin macluumaadkaaga shahsiga ama dhaqaalaha adiga oo uga jawaabaya codsiga aadan filayn.

Ururada saxda ah kuma soo wacayaan, iimayl kuuma soo diri doonaan, ama fariin si ay kuu weydiyaan macluumaadkaaga shahsiga ah, sida Lambarka Ammaanka Bulshada, akoonka bangiga, ama lambarada kaarka lacagta lagula baxo.

haddii aad iimayl ama fariin qoraal ah ka hesho shirkad aad la shaqayso aadna u malaynayso in uu mid dhab ah yahay, waxaa sidaasoo ay tahay wanaagsan in aadan riixin wax link-yo ah. Taas badalkeeda, la xiriir adiga o adeegsanaya websayt aad ogtahay in la aamini karo. Amase raadi lambarkooda teleefoonka. Ha wicin lambar ay ayagu ku siiyeen ama lambarka kaaga muuqanaya aqoonsiga qofka kusoo wacaya.

## ► Iska difaac cadaadiska ku saabsan in aad si dhakhso ah howl u qabato.

Hawlahaa saxda ah waxay ku siinayaan wakhti aad go'aan ku qaadato. Qof kasta oo kugu cadaadiya in aad lacag siiso ama aad siiso macluumaadkaaga gaarka ah waa burcad.

## ► Baro qaabka burcadda interneetku kuugu sheegayaan in aad lacag bixiso.

Marna lacag ha siin qof kugu adkaynaya in aad lacagta ku siiso cryptocurrency, adeeg xawilaad sida Western Union ama MoneyGram, ama kaarka wax lagu iibsado. Marna lacag haku shubin jeeg oo lacag ha u celin qof.

## ► Joogso oo la hadal qof aad aaminsan tahay.

Kahor inta aadan wax kale samayn, u sheeg qof— saaxiib, xubin qoyska ka tirsan, dariska — waxa dhacay. Ka hadliddu waxay kaa caawinaysaa in aad ogaato in ay burcad yihiin.



FEDERAL TRADE  
COMMISSION



Luuliyo 2023

## Khiyaanooyinka u sheeg FTC

Haddii lagu khiyaameeyay ama aad u malayo inaad aragtay khiyaano, wac 877-382-4357, oo riix 3 luuqadaha kale, ka dibna O si aad u hesho luuqado badan — ama gal [ReportFraud.ftc.gov](http://ReportFraud.ftc.gov)